



UJEEEDO: WAKAALAD GUUD "PROCURO DE GENERALE"

Maanta oo ay taariikhdu tahay 14/06/2025, Anigoo ah **Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Nootayo"**, Lehna Nootaayaha Tayo, Xafiisna ku leh Wadada Koowaad ee Suuqa Bakaaraha Dhinaca Galbeed ee Daarta Maalin Taajir ee Magaalada Muqdisho, Waxaa iyyimid ayagoo heshiis ah, Mudanayaasha hoos ku Xusan:-

WAKAALAD BIXISO:- JAMILO ABDULLAHI WARSAME, Hooyo Xaawo Cabdulle Barre, Somali ah, Ku Dhalatay: Somalia, Sanadkii: 01-01-1980, Sita: Usa Pass.no., Lr. A07923422

LA WAKIISHE:- FARHAN AHMED EGAL, Ina Xaliimo Cabdullahi warsame, Somali ah, Ku Dhashay Somalia, Sanadkii: 24-12-1970, Degan Wardhigleey, Sita Norway Passport, Lr. CCC119435

B- Aniga oo ah **JAMILO ABDULLAHI WARSAME**, Waxaan qoraalkaan ku Cadaynayaa Aniga oo Maskaxda iyo Caqligaba ka fiyow Cid I qasabtayna aysan Jirin in aan Wakiishay **FARHAN AHMED EGAL** una wakiishay Wax Alaale Waxii Hanti ah ee aan sida tooska ah milkiyadeeda u leeyahay gurto iyo maguurta ah, kuna taala Gobolka Banaadir & Gobolada kale ee dalka sida guryo, dhulal banaan, goof, beer, gaadiid, sheer shirkadeed, I.W.M, in hantidaas uu gadi karo, Wareejin karo, Hibeyn karo, dhisi karo, ijaari karo, u dacwoon karo, qareen u qaban karo, uguna doodi karo Maxkamadaha dalka hortooda, Waxaan mar kale sii caddeynayaa in **FARHAN AHMED EGAL** awoodaas aan siiyay uu u madax banaan yahay oo aniga Hantidaas aan soo sheegay ka macaamilideeda wax la iiga baahan karo aysan jiri doonin.

T- Aniga oo ah **FARHAN AHMED EGAL**, Waxaan Nootaayada Horteeda Ka Caddaynayaa in aan aqbalay Wakaalada ay isiisay **JAMILO ABDULLAHI WARSAME**, islamarkaana aan Xilkaas aan ugu Soo Bixi doono Si Hufan oo Shareecada Islaamka Waafaqsan Insha Allah.

SAXIIXA WAKAALAD BIXISADA

JAMILO ABDULLAHI WARSAME




SAXIIXA LA WAKIISHAHA

FARHAN AHMED EGAL






SAXIIXA MARKHAATIYAASHA

1- MUHIDIN YUSUF MOHAMED




2- ABDIAZIZ AHMED FARAH


(XAFIISKA NOOTAAYAHA)

REP. 1623/T.P.N/25, Tr. 14/06/2025, Muqdisho, Anigoo ah Nootaayaha Tayo:- **Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Nootayo"**, Waxaan Sugayaa in Saxiixyada Kor Ku Xusan ay yihiin Saxiixyadii Runta ahaa ee 1- **JAMILO ABDULLAHI WARSAME** Ahna (Wakaalad Bixiso), 2- **FARHAN AHMED EGAL** Ahna (La Wakiishe) iyo Markhaatiyaasha, Waxaana Laga Wada Saxiixay ayagoo Raali ah, Caafimaad Qaba, Maskaxdoodu Taam tahay, Cid Khasabtayna aysan jirin Ka dib Markii Loo Aqriyey Wakaaladaan, Waxaa Lagu Qoray Diiwaanka Guud ee Nootaayada Waxaana Loo Keydiyey Nuqul.



NOOTAAYAHA

Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Nootayo"








FOOMKA BIXINTA DUKUMINTIGA

Tr. 17/06/2025

Aniga oo ah **Maxamed Cabdi Cali** waxaan halkaan ka cadeynayaa in aan ku wareejiyay **Farxaan Axmed Cigaal** Dukumiintiga **Original** Wakaalada Guud ee **Rep No. 1623/T.P.N/25**, Tr. **14/06/2025**, faah faahintiisuna tahay sidan soo socota:

Magaca La Wakiishaha	Farxaan Axmed Cigaal
Nooca	Wakaalad Guud
Loo Wakiishay	Dhamaan Hantida Wakaalad Bixisada Jamiilo C/Ilaahi Warsame
Taariikhda Wakaalada	14/06/2025

La Wakiishe: Aniga oo ah **Farxaan Axmed Cigaal**, Leh Tel No. **0614863577**, Degan **Muqdisho** Waxaan Halkaan ka Cadeynayaa in aan ka Qaatay Xafiiska **Nootaayaha Tayo** Dukumiintiga Wakaalada faah faahinteedu Sare ku cadahay.



SAXIIXA DUKUMINTI BIXIYAHA

Maxamed Cabdi Cali

SAXIIXA DUKUMINTI QAADAHA

Farxaan Axmed Cigaal